

Xeerarka Shaqada ama Hawlaha ee OHP:

Waxaan haystaa Medicare iyo OHP. Xeerarka cusub ee shaqada ama hawlaha ee OHP ma i khuseeyaan?

Jawaabta Kooban

Maya. Xeerarka shaqada ama hawlaha ee OHP kuma khuseeyaan inta aad haysato Medicare.



Maxaan u baahanahay inaan ogaado?

Medicare wuxuu weli ahaan doonaa caymiskaaga caafimaad ee ugu weyn. OHP wuxuu kaa caawin karaa bixinta qaar ka mid ah kharashaadkaaga Medicare. OHP wuxuu sidoo kale dabooli karaa adeegyo kale sida daryeelka ilkaha iyo gaadiidka lagu tago ballamaha daryeelka caafimaadka.

Xeerarka cusub ee shaqada ama hawlaha waxba kama beddelayaan barnaamijyadan.

Tus dhammaan kaararkaaga caymiska caafimaadka marka aad hesho daryeel caafimaad.



Ka warran haddii aan sidoo kale helo faa'iidooyinka cuntada ee SNAP?

SNAP iyo OHP waxay leeyihiin xeerar kala duwan oo ku saabsan shaqada ama hawlaha.

Haysashada Medicare mar walba macnaheedu ma aha in lagaa dhaafay xeerarka SNAP. Waxaa laga yaabaa in lagaa dhafo sababo la xiriira da'daada, naafonimo, baahi caafimaad, daryeelka aad qof kale siiso ama sabab kale awgood. Noo sheeg haddii aad u malaynayso inaad u qalanto ka-dhaafitaan marka aad codsanayso ama cusboonaysiinayso SNAP.



Maxaan sameeyaa?

- ✓ Akhri ogeysiis kasta oo aad hesho.
- ✓ Dhammaystir cusboonaysiinta OHP-gaaga ugu dambayn taariikhda ku qoran ogeysiiskaaga.
- ✓ Hubi in cinwaankaaga, lambarka taleefankaaga iyo iimaylkaagu ay yihiin kuwa aad hadda isticmaalayso.
- ✓ Noo sheeg haddii aad hesho Medicare ama aad lumiso caymiska Medicare.

Xeerarka Shaqada ama Hawlaha ee OHP:

Waxaan haystaa Medicare iyo OHP. Xeerarka cusub ee shaqada ama hawlaha ee OHP ma i khuseeyaan?



Waxaad maareyn kartaa faa'iidooyinkaaga OHP:

- Onlayn adigoo adeegsanayo barta <https://www.Benefits.Oregon.gov>.
- Adigoo isticmaalaya app-ka bilaashka ah ee Oregon ONE Mobile.
- Adigoo Xarunta Adeegga Macmiilka ee ONE ka wacayo lambarka 800-699-9075. Wicitaannada gudbinta waa la soo dhawaynayaa.



Halka Caawimo Laga Helo

Su'aalaha ku saabsan Medicare:

Booqo <https://www.medicare.gov> ama wac
1-800-MEDICARE (1-800-633-4227)
Isticmaalayaasha TTY way soo wici karaan
1-877-486-2048

Su'aalaha ku saabsan xeerarka shaqada ama hawlaha ee SNAP:

Soo wac 833-947-1694

Waxaad sidoo kale la xiriir kartaa Xafiiska deegaankaaga ee Adeegyada Dadka Waayeelka ah iyo Dadka Naafada ah ama Hay'adda Deegaanka ee Dadka Waayeelka ah. Ama ka wac Xarunta Xiriirka Khayraadka Dadka Waayeelka ah iyo Dadka Naafada ah lambarka **855-673-2372**.

Ma aha inaad keligaa arrintan xal u raadiso. Qof kaa caawiya adeegyadaada ayaa kaa caawin kara inaad hesho meesha saxda ah ee aad wacayso.

Wax badan ka ogow barta: <https://OHP.Oregon.gov/HR1>



Waxaad dukumeentigan ku heli kartaa luqado kale, far waaweyn, farta indhoolayaasha ee Braille ama qaab aad doorbidayso, adigoo wax lacag ah bixin. Kala xiriir OHP one.communications@odhsoha.oregon.gov.